

# **Barnaamijka Qiimaynta Luuqadda ee Nebraska ee loogu talagalay Carruurta da'oodu u dhexeyso Dhalashada ilaa 5 jir ee Dhegoolaha ah ama Maqalka Ku Adag Yahay**



## **Waa maxay Barnaamijka Qiimaynta Luuqadda ee loogu talagalay Carruurta Da'doodu tahay Dhalashada-5 jir ee Dhagoolaha ah ama Maqalka ku Adag Yahay?**

Sannadkii 2020-kii, Qaanunka Gobolka ee Dib-loo-eegay ee Nebraska ee SS-71-4746 waxay u aqoonsatay Farahadalka Maraykanka inay tahay luuqad ka duwan luuqadaha kale oo gooni ah waxayna dejisay barnaamij qiimayn luuqadeed oo loogu talagalay carruurta dhagoolaha ah ama maqalka ku adag yahay. Waaxda Waxbarashada ee Gobolka Nebraska, iyadoo la kaashanaysa Guddiga Nebraska ee Dadka Dhagoolaha ah iyo Maqalka Ku Adag Yahay (NCDHH) waxay sidoo kale bixisa warbixin wadajir ah sannad kasta oo ku saabsan marxaladaha horumarinta luuqadda iyo akhris-qoraalka ee carruurta Nebraska ee da'doodu tahay dhalashada ilaa 5 jir. Wuxaad dib uga eegi kartaa warbixinta halkan: <https://www.education.ne.gov/sped/lead-k/>.

## **Maxay tani uga dhigan tahay ilmahaaga iyo qoyskaaga?**

Kooxdaada IFSP/IEP ee hadda jirta waxay isticmaali doonaan qiimayno dheeraad ah si ay ula socon doonaan horumarka luuqadeed ee ilmahaaga si sannadle ah, iyagoo la jaanqaadayo IFSP-ga ama IEP-ga ilmahaaga ee sannadlaha ah. Xogta aan la cayimin ayaa laga uruurin doonaan gobolka oo dhan si loola socdo in carruurta dhagoolaha ah ama maqalka ku adag yahay ay leeyihii xirfadaha luuqadeed ee looga baahan yahay si ay diyaar ugu noqdaan dugsiga barbaarinta. Ma jirto xog gaar ah oo ku saabsan ilmahaaga oo la wadaagi doono. Kooxdaada Qiimaynta Luuqadeed ayaa laga yaabaa inay iskaashi la sameeyaan Hagaha Gacmaha iyo Codka ee ka baxa barnaamijka Dhinacaaga si loo hubiyo in khayraadka oo dhan ay helaan qoyskaaga.



## **Waa maxay waxaad filan karto inta lagu gudajiro qiimeynnta luuqadda?**

Qiimaynta luuqadda waxaa si lacag la'aan ah lagu siin doonaa qoysaska waxaana lagu samayn doonaa qayb ka mid ah hannaanada qiimaynta iyo falanqaynta ee jira iyada oo loo marayo shuruucda gobolka iyo tan federaalka. Qiimayntan waxa ku jiri kara in wax lagaa waydiyo wadaxiriirka iyo la dhaqanka ilmahaaga. Si aad u hesho wixii macluumaa dheeraad ah, oo ay ku jiraan liiska qiimaynta luuqadda ee lagu taliyey fadlan booqo <https://www.education.ne.gov/sped/lead-k/>. Waalidiinta iyo daryeelayaasha waxay macluumaa dheeraad ah ka codsan karaan Hagaha Gacmaha iyo Codka ee ka baxa Dhinacaaga ama Xarunta Tababarka iyo Macluumaa dhaalidka Waalidka ee Nebraska.

## **Xuquuqdaada Waalid Ahaan**

Degmo-dugsiyeedka waa inay ku siisa ogaysiis hore oo qoraal ah ayna hesho oggolaanshaaaga qoran ka hor inta aan ilmahaaga lagu samayn wax qiimayn ama falaqayno ah. Waalidiinta haysta dhallaanka, socod-baradyada, iyo kuwa welii dhigta dugsiga barbaarinta ee hela adeegyada IFSP/IEP waxay xaq u leeyihii inay diidaan qiimeynnta luuqadda iyaga oo aan khatar gelinayn helitaanka adeegyada kale ee IFSP/IEP ee ilmahaagu/qoyskaagu ay helaan. Ka waalid ahaan, waxaad ku martiqadi kartaa hay'ad kasta oo dibadda ah, xubin qoyska ka mid ah, u-doode ama qof kasta oo aqoon u leh ilmahaaga inuu qiimaynta ka qaybqaato. Si aad u hesho macluumaa dheeraad ah oo ku saabsan xuquuqhaaga, waxaad la hadli kartaa Isku-duwaha Adeegyada Shabakadda Korriinka Hore ee ilmahaaga (carruurta da'doodu tahay 0-3), Waaxda Waxbarashada ee Nebraska-Xafiiska Waxbarashada Gaarka ah (402-471-2471), Mac'hadka Tababarka Waalidka ee Nebraska (800-284-8520), ama Xuquuqhaaga Naafada ee Nebraska (800-442-6691).

